

Dhisid urur – liiska hubinta

Fikir urur

Inaad tihiiin dhowr qof oo xiiseeya wax isku mida doonayana iney arintaa uga howl-galaan si samafal ah. In howl-galka oo ay lacag ku baxeyso oo aad u baahan tihiiin qasnad idinka dhaxeysa ee fikirka ururkiina. In ururku yahay mid dimuqraadiyad ku dhisan ee qasnadda – nooca ururka.

Xeer

Inaad sameysaan bandhig xeer. Halkaa waxa laga dheehan karaa qaabka ururkiinu u dhisan yahay. Mustaqbalka waa in gudi cusubi aqrisan karo xeerka si uu u ogaado qaabka loo howl-galinayo ururka.

Kulanka dhismaha

Liiska dadka xaadirka ahaa, sharaxid ujeedada iyo hadafka ururka iyo go'aanka xeerka waa in laga heli karaa borotokoolka kulanka dhismaha.

Kulanka doorashada

Kulanka koowaad ee gudiga. Borotokoolka kulanka wuxuu sheegayaa shaqada gudiga iyo howsha qof kastaa leeyaha. Sida loo doortay gudiga, siduu u dhisan yahay. Kulanki badanaa waa mid yar oo la qabto toos kadib marka uu dhaco kulanka dhismaha.

Xeer, borotokoolka kulanka dhismaha iyo borotokoolka doorashada

IMINKA WAXAAD TIHIIN URUR! Waxaad heysataan sadax dokumenti. Borotokoolka waa la saxayaa kadibna la daabacayaa. Tani ayaa caddeyn u ah inaad urur dhiseen.

Codsiga ka diiwaan gelinta ururka xafiiska canshuuraadka

Dir foomka dalabka adigoo raacinaya sadaxda dokumenti, si aad ururka u diiwaan geliso kadibna u hesho *lambar urur*.

Bangiga ka dalbo akoon urur

La hadal bangi oo ula tag dokumentigaaga iyo dokumentiga caddeynaya lambarka ururka.

Ururka ka diiwaan geli ururkiina guud ee isu tag ah

Haddii aad dooneysaan suura galna ay idiin tahay inaad ka mid noqotaan urur guud.

He'adda dhaqanka iyo xiliga madadaalada (Kultur och fritid) ka dalbo inaad ku biirto diiwaan-gelinta ururada degaanka

Foomka dalabka waxaad ka heleysaa meesha hoose ee Warbixin intaa dheer (Mer information) ee midigta. Ururada la ogolaado ee diiwaan gashan waxey qiime jaban ku kireysan karaan golayaasha degaanka iyagoo taa ka sameysanaya hey'adda Kultur och fritid.

Waxa muhima in wakiilada ururku leeyihiin aqoon asaasiya ee qawaaniinta ururada! Waxaa kaloo faa'iido leh haddii dhowr xubnood ee ururka ka tirsani leeyihiin aqoontaa iyadoo taa keeneysa in shaqada samafalka ahi aaney culeys weyn keenin maadaama dhowr qofood ay qeybsaneyso howlaha kala duwan.

Waxaynu waaya aragnimo u leenahay in marka ururka cusubi uu xubin ka noqdo urur isku taga ee waxbarasho ay sameyn karaan hirgelinta waxbarasho ee sida loo hago urur. Warbixinta xiriirka ee ururada isku taga waxbarasho waxad ka heleysaa halkan.